SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1071
II PETER CHAPTER 2:11-18

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC AND UNDER

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu caaway horey idiinku sii wadaynaa warqaddii labaad ee rasuul Butros. Waxaanan idiin dul marnay warqaddan doodaha ka taagan iyo weliba mawduuca rasuul Butros warqaddan uu ku adkaynayo.

Waxaana mawduuca guud ee warqaddan labaad laynoogu soo koobay cutubka 3:18, baalka 415 ee kitaabka Axdiga Cusub. Waxaana rasuulku, isagoo soo koobaya dulucda guud ee warqaddan labaad uu leeyahay sidatan:

"Laakiinse ku kora nimcada iyo aqoonta

Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix, Isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo weligeedba Aamiin."

SONG: REEL----CUT-----

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxay inoo joogtay aayadda 10aad markaasoo rasuul Butros si kharaar uga hadlay kuwa aan cisaynin cuqaasha iyo weliba mutacallimiinta dadkooda. Waa kuwa ku farxa waxyaabaha jidhka ka farxiya, oo waa niman aalaaba jecel inay u raaxeeyaan nafta. Kii iyaga ka hor yimaadana waa cadowgooda.

Waxay kaloo ka hor yimaadaan xukuumadaha. Waa niman sharcilaawyaaal ah, oo nin waliba oo cibaadalaawi ah, waa sharci-laawe. Waxaa kuwaas lagu sheegay inay damaca nijaasta ah ku socdaan, oo sayidnimadana quudhsanaad. Waxaa kaloo laynoo sheegay inay indha adag yihiin oo ay macangagiin yihiin, oo aan xushmad u haynin kuwa derajada leh.

Marka uu leeyahay sayidyada, ayaa loo jeedaa dawladaha ama xukuumadaha dhulka. Bil xaqiiqa waa dhab in la doonayo in masiixyiintu ay derajeeyaan dawladahooda, oo welibana ku taageeraan hawlahooda ah in sharciga iyo ammaankaba la sugo. Kalmadda uu u isticmaalay sayidyo, waxaa weeye kalmadda kuriotes oo ka dhigan dawlad.

Waxaa kaloo erayga Sayidyo soo qaatay rasuul Bwlos sida ku qoran cutubka kowaad ee warqaddiisii uu u oqra reer Efesos. Waxaa kaloo isla kalmaddaas isticmaalay rasuul

Yuudas. Tan rasuul Bawlos isticmaalay waa Sayidnimada ruux ahaaneed oo ma khusayso tan dawladaha ama xukuumadaha. Waxaana ay ka dhigan tahay haddaba in cibadalaa-wayaashu ay ka leexaadn waxyaabaha Ilaah, ama ay liidaan kuwa iyaga culimada u ah ee qawlka Ilaah wax ka bara.

Waana wax waliba ee Ilaah iyaga uu hoos keenay, oo dooni maayaan inay u hoggaansamaan. Waa niman madax adag, oo macangag ah, welibana wax waliba ee wanaagsan xumaan bay ka sheegaan, oo waxa waliba oo qoduus ahna way liidaan. Ma derajeeyaan dadka aqoonta leh, oo waxaaba suuragal ah inay caayaan ama af-lagaadeeyaan, ama toorreeyo u soo qaataan kuwa wax ka bara hadallada Ilaah.

Weliba waxay mar waliba si been ah ku soo hadal qaadaan magaca Ilaah. Waxaannu haddaba caaway meeriska cutubka ka sii wadaynaa dhegaystayaal Warqaddii labaad ee rasuul Butros isla cutubka 2aad, aayadda 11aad, baalka 413 ee Axdiga Cusub, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Malaa'ighuna in kastoo ay iyaga itaal iyo xoogba ka badan yihiin, iyaga dacwo cay ah Rabbiga hotiisa kagama dacweeyaan."

Haddaba macallimada beenaaleyaasha ah way kibirsan yihiin, waxanay sameeyaan waxyaalo ay malaa'igtu ku dhicin inay samayso. Waxaa kitaabka Yuudas laynoogu sheegayaa in Mikaa'iil oo ah madaxa malaa'igaha Ilaah u adeea uu kula dagaallamay shayddaanka jidhkii Muuse.

Waayo Shayddaanku ma doonaynin in Muuse la soo sara-kiciyo oo uu goob joog ka ahaado dhalanroggii ammaanta ee Ciise Masiix. Waxaa markaa bilowday dood iyo muran dhex maray malagga u sarreeya malaa'igaha Ilaah. Habase yeeshee doodda malaggu ma badnayn sida rasuul Yuudas inoo sheegayo.

Mikaaiil wuxuu shayddaanka ku yiri, **"Rabbigu ha ku canaanto,"** sida ku qoran aayadda sagaalaad ee cutubka kowaad. Warqaddu waa hal cutub, oo cutubyo kale ma lahan. Haddaba waa inaynu rasuullada kaga dayannaa dabiicadda qabow iyo weliba inaan wakhti lagu luminin muran iyo doodo dhaadheer. Hadallada tirada badan ee shayddaanka iyo adeegayaashiisa laysaga rajiimo ayaan loo baahnayn. Waa in sida Makaa'iil oo kale la yiraahdo, **"Rabbigu ha ku canaanto."** Maaddaama Mikaa'iil qudhiisu uu shanqar yaraa, oo uusan dood iyo hadallo dhaadheer kala hor imanin Shayddaanka ayaa loo baahan yahay kuweenna muuniniinta ah inaan yeelanno dabiicaddaas oo kale, oo aynaan dood badnaan.

Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 2aad ayaannu diin akhriyeynaa aayadda 12aad, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Laakiinse kuwanu waa sida xayawaan aan caqli lahayn oo u dhashay in la qabsado oo la dilo, oo waxay caayaan wax aanay garanayn. Hubaal iyagu haligaaddooda ayay ku haligmi doonaan."

Waxaa rasuulku imminka leeyahay, **"Laakiinse**

kuwanu waa sida xayawaan aan caqli lahayn oo u dhashay in la qabsado oo la dilo." Marka ay sidan tahay wuxuu leeyahay, kuwanu waa niman habaaran, oo aan waxba doorin xayawaanka. Haddaba waxaannu garanaynaa inay jiraan rag iyo weliba dumar u nool sida xayawaanka oo kale.

Haddii talooyinka iyo waanada iyo dardaaranka ay Hadallada Ilaah bixinayaan laga tago, noloshuba qiimi yeelan mayso.

Noloshu waxay qiimi ku yeelataa in la xakameeyo, haddii kale xayawaanka waxba ma doorinno. Waana hadallada Ilaah waxa dabiicadaha qallafsan ee aadmiga xakameeya, kuwaasoo haddaan layska eegin qofka u keeni kara inuu u noolaado sida xayawaanka duurka.

Wuxuu rasuulku leeyahay: **"Kuwa inkaarta qaba ee Ilaah u soo noqon waayey, waxay u nool yihiin sida xaywanaan aan caqli lahayn oo u dhashay in la qabsado oo la dilo."** Waxaan garanaynaa kuwa diiddan inay sharciga u hoggaansamaan oo raalli ku ahaadaan waxa ay maalinta soo xoogsadaan, oo doonaya inay dad kale wixii oo boobaan, inaanay waxba dhaamin xayawaanka duurka.

Waa xayawaanka dadka dhibaatooyinka u geysta sida dhurwaaga iyo libaaxa iyo haramcadka iyo weliba masaska. Markii ay dadka waxyeelaan inta rag dhalinyaro ah loo diyaariyo, oo la hubeeyo, ayaa la daba-galaa ilaa la soo dilo ama laga takhaluso. Kuwa diida sharciga Ilaahna ugu dambaynta waxay noqonayaan sida

xayawaan oo kale, markaasaa la dilayaa ama laga takhalusayaa.

Cawaaqibkooduna wuxuu ku dambeeyaa baaba'. Micna ma leh haddii aad ka tirsan tahay qoys ballaaran ama qabiil xoog leh. Waxaa lagaa doonayaa inaad noqoto nin cibaada leh, oo dadka xaq-dhowra, oo u fiirsada Hadallada qirada weyn leh ee Ilaah. Ninnana ha ku eedaynin rumaysadkiisa iyo weliba waxyaalaha uu aaminsan yahay.

Horey baa Soomaalidu u tiri, **"nin waliba qumanihiis ayaaa qoorta ugu jira."** Waxay taasu ka macne tahay inaad qof waliba ku darajayso waxa uu rumaysan yahay, oo aanay kula noqon in waxa adigu aad rumaysan tahay ay saxiix yihiin, waxa qofka kale rumaysan yahayna ay khalad wada yihiin. Haddii aad ka mid tahay kuwa u arka in iyagu un ay haystaan runta, ayaa waxaa soo gelaysaa kuwa rasuulku ka hadlay, waa rasuul Butros e, markuu lahaa:

"Oo waxay caayaan waxa ayan garanayn." Haddaba hadii aadan dariiqada masiixinnimada waxba ka garanaynin, innaga ina soo weyddii waannu kuusharraxaynaaye. Balse yaanay kula noqon in kelidaa aad runta haysato dadka kale oo dhann ay khaldan yihiin. Rag waxaa jiray xigmad lahaa, oo aan ku tiirsanayn inta ay ka garanayaan kitaabka Baybalka.

Waxaa raggaas ka mid ahaa nin la oran jiray **'William Wilberforce, oo isagu ahaa nin ka tirsan aqalka baarlamaanka, blase wuxuu ahaa nin qamrooliiste ah ama aalkulayste ah, oo**

noloshiisuna waxay ku sii jeedday adduun iyo aakhiro seeg ama baaba' iyo halaag ilaa uu kolkii dambe Masiixa rumaystay. Kolkii dambe wuxuu bilaabay inuu saaxiibkii uga warramo wanaagga Masiixa iyo waxa keenay in isaga qudhiisuba uu noqdo Masiixi.

Waxay isku soo raacaan wacdiye dadka wax ka bara Hadallada Ilaah oo ahaa Scotish. Saaxiibkii waxaa la oran jiray Edmund Burke, wuxuuna ahaa ruug caddaa siyaasi ah oo ka tirsanaa dawladda Ingiriiska. Markii uu maqlay haddaba ninkan siyaasiga ahi wacdiyihii weynaa oo khudbadaynaya ee laga soo kala tegay kiniisadda, ayaa saaxiibkii William Welberforce su'aal weyddiiyey.

Wuxuu ku yiri sidee baad u aragtay khudbadda iyo weliba wacdiyaha. Wuxuu ku yiri, **"Ninkani waa nin hadal yaqaan ah, laakiinse muxuu ka hadlayey?"** Haddaba ninkan ruug caddaaga ah ayaa markii lagu wacdiyey Injiilka Masiixa, su'aal ka keenay oo wuxuu yiri, **"Garan maayo waxa wacdiiyuhu ka hadlay!"** Haddaba hadalku wuxuu u dhacayaa in aanay ku xirnayn farriinta Injiilka maqliddeeda sida wacdiyuhu wax u bartay ama aqoontiisa. Waxay ku xiran tahay in Ilaah furo qalbiga kan maqlaya. Haddaan Ilaah furin qalibga kan maqlaya, mince yeelan mayso farriintu, oo sidii Edmund Burke, ayaa waxaad leedahay,

"Muxuu wacdiyihu ka hadlayey!" Waxaa rasuulka oo arrinka caynkaas oo kale ka hadlayaa leeyahay; **"Hubaal iyagu haligaaddooda ayay ku**

haligmi doonaan." Wakhti sii horreeyey ayaa Butros wuxuu inagala hadlay wax ku saabsan in qofka Ilaah ka baxsanayo dunida ama ka-fikiriddeeda iyo inay lahaadaan fikir la mid ah kuwa ay qabaan cibaadalaawayaasha. Waxaa haddaba laynoo sheegayaa in cibaadalaawayaasha ayan ka baxsan doonin haligaadda iyo musuqmaasuqa ay ku jiraan, oo waxay noqdeen kuwo nijaaso ah.

Waxaa jra kuwo badan oo aan badbaadin oo ay la tahay waxa masiixyiintu samaynayaan ama waxyaabaha ay rumaysan yihiin, Nacasnimo. Kuwa caynkaas oo kale ah waxay abid ku sugnaanayaan baadinnimo, waayo way isla weyn yihiin, iyagoo weliba aan garasho u lahayn kitaabka qoduuska ah. Waxaad maqlaysaa iyaga oo leh, **"Ma masiixinnimada ayaa diin ah, waa beec-sharo e."**

Waxaa ugu wacan inaanay waxba ka garanaynin kitabka Qoduuska ah, welibana ma doonayaan, waayo waa niman meel loo wato, oo Ilaah wuxuu leeyahay, **"Hubaal iyagu haligaaddooda ayay ku haligmi doonaan."** Haligaad waxaa weeye khiyaanada iyo musuqmaasuqa ay ku jiraan, taas ayey ku halligmi doonaan. Wel waxaannu horey idiinku sii wadaynaa meriska cutubka labaad ee Warqaddan labaad ee rasuul Butros 2:13, waxaana qorniinka qoduuska ahu leeyahay sidatan: **"Xaqdarroadooda waxaa loogu abaalgudaa xaqdarro, oo waxaa iyaga la wanaagsan inay maalinnimada raaxaystaan. Iyagu waa waskhaamiin iyo ceebaalowyo, oo**

markay idinla feeysteeyaan waxay ku raaxaystaan khiyaanadooda."

Aayadaha 13-14 ayaa waxaa ku qroan caynka ay yihiin kuwa rumaysadka ka noqday iyo sida qalbigoodu u kharibmay. Markii qofku khaladaad aamino, maskaxdiisa oo dhan waxay u shaqaynaysa siyaabo khaldan oo ka soo hor-jeedda samada iyo damiirka hagaagsan.

Waxaa laga yaabaa inuu kuugu yiraahdo isku caqiiddo ayaan nahay, haddana, illeyn waxba ma rumaysna e, uu ku fikiro inuu ku dibindaabyeeyo, ama ku dilo. Warka uu leeyahayna laguma kalsoonaan karo waayo maskaxdiisu ma fadhiso ama juusto maahan, oo waa nin aan bil-xaqiiqa lagu kalsoonaan karin. Waa nin sida uu doono u noolaada, oo wax walibana wuxuu u samaynayaa, **"Jeenigaa furan."** Haddii aad weyddiiso oo ku tiraahdo, War waa ku sidee saaxiib, sowdigii nin muumin ah isku sheegayey, waa maxay tuugannimadu? Jawaabtiisu waxay noqonaysaa: **"Afaarahayga ha soo gelin waryaa. Ma adigaa Ilaah wakiil iiga ah?"**

Qofkaas oo kale haddii loogu kalsoonaado inuu hoggamiyo waddankiisa, isaga ayaa burburinaya waddanka, oo wuxuu bilaabayaa inuu dadka kala qaybiyo si ay isku laayaan oo wuxuu abuurayaa jawi xasilooni darro ah. Haddaba nin waliba oo dawlad xukumaya ama maamula waa inuu noqdo nin daacad ah, oo lagu yaqaanno inuu yahay nin ka damqada dhibaatooyinka dadkiisa.

Nin umadda hoos joogta ka fakara, oo

dhibaatadooda ka xanuunsada, kaasoo weliba damiirkiisu hagaagsan yahay. Nin aan isla qumaynayn, oo aan qumanihiisa qoorta u surnayn. Nin rumaysan inuu khaldanaan karo, nin rumaysan in la sixi karo, nin rumaysan in uu u baahan yahay taageeradad walaalkii.

Haddaan faalladii dheerayd ee aayadda 13aad intaas kaga baxno ayaannu imminkana idiin kahriyeynaa aayadda 14aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Waxay leeyihiin inhdo sino miidhan ah oo aan dembi ka joogsan karin. Kuwa aan adkayn ayay sasabtaan, waxayna leeyihiin qalbi damacxumaan ku nonnoqda, oo waa dad nacladeed."

Weli rasuulku wuxuu masaal ka bixinayaa caynadda kuwa ka noqda hadalka oo munaafiqiinta ah. Wuxuuna isticmaalayaa luuqad kharaar marka uu ka hadlayo macallimada sharka! Waxaanay ku eedaysan yihiin xumaanta rasuulku uu ka sheegayo, oo yaanay kula noqon in Ilaah aanku u ciqaabaynin xumaantooda.

Weli waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal meeriska cutubka 2aad, waxaana qorniinka qoduuska ah leeyahay sida ku qoran aayadda 15aad, waxaana qoran sidatan:

"Jidkii qummanaa ayay ka leexdeen oo way ambadeen, waxayna raaceen jidkii Balcaam ina Becoor oo jeclaaday abaalgudka xaqdarrada."

sidaad og tihiin kuwiinna brnamijka la socday sannadadii la soo dhaafay, ayaan filayaa inaad xusuusataan qisadii Becoor ina Balcaam oo

aannu idiinka akhrinnay kitaabkii 4aad ee Muuse oo loo yaqaanno Tirintii cutubka 22aad ilaa iyo kan 24aad.

Rasuul Butros wuxuu ku sifaynayaa laba wejiilayaasha iyo kuwa ka ambaday runta Injiilka, sida ina qaadeen jidkii Balcaam. Rasuul Yuudasna wuxuu ku sifeeyey inay raceen khiyaanadii Balcaam. Marka la soo gaaro kitaabka muujintiina waxaa kuwaa lagu sifeeyaa inay raaceen waxbariddii Balcaam. Haddaba masaalladaas oo dhan, waa kuwa laga bixinayo kuwii Ilaah diiday e, way kala duwan yihiin.

Muxuu haddaba rasuul Butros ula jeedaa jidkii Balcaam?

Waxaa rasuulku ku sifaynayaa jidkaas, jidkii ina Becoor oo isagu jeclaaday abaalgudka xaqdarrada. Balcaam wuu garanayey inaan Ilaah doonayn in Israa'iil laga hor yimaado, oo wax iyaga ka gees ah la sii waxyoodo. Habase yeeshee wuxuu jeclaystay hadiyadaha boqorka reer Moo'aab ee la oran jiray Baalaaq ina Sifoore.

Oo wuxuu ahaa sida, Butros imminka leeyahay, **"Nin hadiyado ku shaqeeya."**

Jidkii Balcaam wuxuu ka dhigan yahay damaca, xaqdarrada, iyo mid diintiisu tahay lacag iyo faa'iido. Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutukba 2aad, waxaanan haatan idiin akhriyeynaa aayadaha 16-17, waxaana qoran sidatan soo socota:

"Laakiinse isaga waxaa loo canaantay xadgudubkiisii aawadiis. Dameer carrab la'

ayaa ku hadlay dad codkiis, oo wuxuu joojiyey waallidii nebiga. Kuwanu waa ilo aan biyo lahayn, iyo ceeryaamo uu duufaan kaxeeyo, oo waxaa iyaga daraaddood loo sii dhigay madowga gudcurka."

Waxaa rasuulku leeyahay, haddaan idiin jilciyo, **"Madow ama mugdi ma jirin, laakiin iyaga dartood baa loo keenay."** Waxay ka walax yihiin mugdiga, ayuu leeyahay rasuul Butros. Wuxuu masaal ka bixinayaa raggan inkaartu ku dhacday ee Bicoor oo kale ahaa, oo inkastoo ay garasho leeyihiin, haddana ay lacag un diintoodu tahay.

Waxay kuwaas oo kale rumaysadka u qaataan sida wax lacag laga sameeyo iyo sida baayac-mushtar. Bil-xaqiiqa masiixiyiinta dadka la wadaaga Hadallada Ilaah waxay u nool yihiin si hoosyasa, oo waxba ma dheera qofka caadiga ah ee ay hadalka gaarsiinayaan.

Waxaa keliya oo ay ka helaan kiniisadaha wax ay ku noolaadaan, hadday noqon lahayd, meel ay seexdaa, hungurigooda iyo weliba, dharkii ay xiran lahaayeen iyo wax waliba oo daruuri ah. Balse ma haystaan lacag badan oo ay dadka siiyaan. Waxay hasytaan oo keliya awoodda qorniinka qoduuska ah ama Injiilka Ciise Masiix, oo Bawlos yiri, **"Hadalka nimcadu waa u xoogga Ilaah kuweenna badbaadaya."**

Nin waliba ee Masiixi ah wuxuu leeyahay xooggaa isaga ah ee laga helo hadallada Injiilka ama iskutallaabta Masiixa. Waa xoogga keliya ee nin waliba ee Masiixi ah uu

leeyahay. Masiixinnimadu kama dhigna in lacag lagu raadsado. Waxaa kaloo rasuulku leeyahay isagoo sharraxaad ka bixinaya kuwa diintootu lacagta tahay: Waa sida ceeryaamo aan biyo lahayn. Harraad kasta oo ku haya looma fadhiyo in ceeryaamo aad biyo ka dhaamiso ama xoolo ka waraabiso. Weli waxaannu ku guda-jirnaa meeriska cutubka 2aad, waxaanan idiin akhriyeynaa aayadda 18aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota oo leh:

"Waayo, iyagu waxay ku hadlaan hadal faan ah oo aan micne lahayn, oo kuwa in yar kaga baxsanaya kuwa qaladka ku socda ayay ku sasabtaan damacyada jidhka xagga nijaasta."

Waa wax qofka Soomaaliga ah aan looga sheekaynaynin faanka dadka qaarkii. Markiise aad u fiirsato faankoodu waa wax aan macna lahayn, iyo hadal aan faa'iido ku jirin. Habeenka xiga ayaannu horey idiinku sii wadaynaa sifaha laga bixinayo munaafaqiinta aan lagu karaynin rumaysadka Ilaah iyo Hadalladiisa Nool.

SONG: REEL----CUT-------

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin